IIB MAGALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسميـــة الجريـــدة

Sannadka 13aad Muqdisho 30 Maajo 1985 L. 1 r 5

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 5 ee 20 Abr. 1985, Oggolaansho Heshiis Dhaqameed oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Kenya. » 320

SHARCI L. 6 ee 20 Abr. 1985, Oggolaansho Heshiis lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baarista Dhulalka lama degaanka oo ka dhexeeya Dawladaha ku jira J. Carabta. » 321

SHARCI L. 7 ee 27 Abr. 1985, Wax ka beddelid Sharciga Hawsha Difaaca Qaranka. » 322

SHARCI L. 8 ee 2 Maajo 1985, Oggolaansho Heshiis Amaheed oo dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dh/ha iyo Bulshada kuna saabsan Maalgelinta Mashruuca. » 323

SHARCI L. 9 ee 6 Maajo 1985, Oggolaansho Axdiga Heshiiska Lome' III oo ka dhexeeya Dalalka ACP iyo EEC ee Sannadka 1984. » 325

QAYBTA LABAAD
X E E R

XETR-SHARCI L. 1 ee 1 Maajo 1985, Kuna saabsan Maadxbannaaneynta Miraha Beeraha. » 326

XEER-SHARCI L. 2 ee 1 Maajo 1985, Kuna saabsan wax ka beddelidda Canshuurta Furdooyinka. » 327

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 16 ee 20 Abr. 1985, Meel-marin Heshiis Dhaqameed oo dhexmaray JDS iyo Jamhuuriyadda Kenya. » 329

DECREE N. 16 on 20 Apr 1985, Instrument of ratification. » 330

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 17 ee 20 Abr. 1985, Meel-marin Heshiis lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baa[illegible]. » 331

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٧ بتاريخ ١٩٨٥/٤/٢٠
التصديق على اتفاقية انشاء المركز العربى لدراسات المناطق الجافة والاراضى القاحلة. ٣٣٢

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 18 ee 2 May 1985, Meel-marin Heshiis Amaaheed oo dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dh/laha iyo Bulshada » 333

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٨ بتاريخ ١٩٨٥/٥/٢
التصديق على اتفاقية قرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية
[illegible] ٣٣٤

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 19 ee 6 May 1985, Meel-marin Axdiga Heshiiska lame III oo ka dhexeeya Dalalka ACP iyo EEC ee Sannadka 84. Bulshada. » 335

DECREE N. 13 on 6 May 1985, Instrument of ratification. » 336

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED 1.3.85, Lumid Jeeg War. L. 002g577 ku qoran Cabdiraxmaan Axmed Nuur L. 139 » 337

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29 4.35, Lumid Jeeg War. L. 10103 ku qoran Ibraahim Aadan Maxamed L.140 » 338

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 24.4 85, Lumid Buug Kayd L. 19034 ku qoran Xabiibo Xayle Cali L. 141 » 339

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 4.5.85, Lumid Jeeg War. L. 0030691 ku qoran Shukun Yuusuf Maxamed L. 142 » 340

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 20.5.85, 024' 297 0034844, ku qoran Maxamed 003' 844, ku qoran Maxamed Cali Cabdullaahi Jaamac L. 143 » 341

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 28.5.85, lumid Buug kayd L. 3680 ku qoran Ismaaciil Xaaji Faarax » 342

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR Cali Cabdullaahi Jaamac L. 143 Qoran Caasha Yuusuf Cabdi » 343

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER 31 Jan. 1985 lumid Jeeg war L. 196308, ku qoran Cabdiraxmaan Maxamed Yuusuf » 344

# QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

Sharci lambar 5 taariikh 20 Abr. 1985, Oggolaannsho Heshiis Dhaqameed oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Kenya.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiis dhaqameed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Kenya, kuna saabsan wax isdhaafsiga iyo wax wada qabsiga xagga Waxbarashada, Sayniska, Caafimaadka, Warfaafinta iyo Isboortiga.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Nayroobi, taariikhdu markay ahayd 28ka Nofembar 1984.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

### Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S.

### Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa awood loo siiyey inuu meel-mariyo heshiiska Sharcigan lagu tilmaamay.

### Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhriyadda.

Muqdisho, 20 Abriile 1985

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 6 taariikh 20 Abr. 1985 Oggolaansho Heshiis lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baarista Dhulalka lama degaanka oo ka dhexeeya Dawladaha ku jira Jaamacadda Carabta.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiis dhexmaray Dawladaha ka tirsan Jaamacadda Carabta oo lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baarista Dhulalka lama Degaanka ah.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Qaahira, sannadku markuu ahaa 1979kii.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS, waxaa awood loo siiyay inuu meel-mariyo heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Abriil 1985

MADAXWEYNAHA JDS

Sharci lambar 7 taariikh 27 Abr. 1985, Wax ka beddelid Sharciga Hawsha Difaaca Qaranka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qodobka 1aad ee Sharciga Hawsha Difaaca Qaranka lambar 32 ee 28.4.1981, waxaa loo beddelay sida soo socota:—

«Ka qeyb galka hawsha Difaaca Qaranka waa waajib muqaddas ah oo saaran muwadin kasta.

Hawsha Difaaca Qaranka waxay ku waajibaysaa muwaadinka labka (ragga) ah ay da'diisu u dhexeyso 18 sano ilaa 40 sano, dheddiggana (dumarka) ay da'doodu u dhexeyso 18 sano ilaa 30 sano, jirkooda iyo caafimaadkoodana ay dhan yihiin.

Muddada qof kasta ku waajib ah inuu guto hawsha Difaaca aQranka waa 2 (laba) sano oo xiriira. Kuwa heysta Shahaado Jaamacadeed, Shhaaado Dugsi Sare iyo Shahaadooyinka u dhigma waxay gudanayaan waajibaadkooda 18 (toban iyo sideed) bilood oo xiriira ah».

Qod. 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kaddib marka lagu soo saaro Faafintna Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 27 Abriile 1985

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 8 taariikh 2 Maajo 1985, Oggolaansho Heshiis Amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan ka qeyb galka maalgelinta Mashruuca Horumarinta Kalluumeysiga Badaha Waqooyi.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA
Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan (1.500.000/= oo ah Kuweyt Dinar) ee loogu tala galay ka qeyb galka maal-gelinta Mashruuca Horumarinta Kalluumeysiga Badaha Waqooyi.

2. Heshiiskan, waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Kuweyt, taariikhdu markay ahayd 10.9.1984.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa awood loo siiyay inuu meel-mariyo heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan, wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 May 1985

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 9, taariikh 6 Maajo 1985, Oggolaansho Axdiga Heshiiska Lome' III oo ka dhexeeya Dalalka ACP iyo EEC ee Sannadka 1984.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Axdiga Lome' III iyo Borotokoolada la xiriira oo dhexmaray Dalalka Afrika, Karaybi iyo Dalalka Badweynta (ACP) iyo Dalalka Suuqa Dhaqaalaha Yurub (EEC).

2. Axdiga Lome' III ee ACP-EEC oo ay ka mid tahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa lagu saxiixay Magaalada Lome' ee Dalka Togo taariikhdu markay ahayd 8dii Disembar 1984.

3. Axdiga Lome' ee sannadka 1984 iyo borotokoolada la xiriira waxay ka mid noqonayaan Sharcigan.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada uu ka kooban yahay Axdiga iyo borotokoolada la xiriira kuna tilmaaman qodobka 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, dhaqan gelintooduna waxaa la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo qodobada uu ka sameeyo ee Axdiga iyo borotokooladiisa.

Qod. 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6 May 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

XEER—SHARCI

XEER-SHARCI Lr. 1 kuna saabsan Madaxbanaaneynta Miraha Beeraha.

MADAXWEYNAHA JDS

ASAGOO ARKAY: Qod. 69 ee Dastuurka J.D.S;

ASAGOO ARKAY: Sharci Lr. 60 ee 8.9.70 iyo isbeddelladiisii ka danbeeyay;

ASAGOO ARKAY: Barnaamijka dib u habeynta dhaqaalaha iyo maaliyadda ee 1.1.1985;

ASAGOO GARAWSADAY: Layama maarmaanimada in Miraha Beeraha lagu habeeyo barnaamijkaas;

ASAGOO DHAGEYSTAY: Talada Golaha Wasiirrada;

IYADOO UU SOO JEjDIYAY: Wasiirka Wasaaradda Beeraha.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharciga soo socda:—

Qod. 1aad

1) laga bilaabo 1.1.1985 Beeraleydu miraha ay soo saaraan waxay u madax'bannaan yihiin inay suuqa ugu gataan qiimaha ay joogaan (Prezzo di mercato).

2. Wakaaladda Horumarinta Beeraha, miraha ay keyd ahaan ugu baahan tahay waxay ka ka iibsaneysaa suuqa hadba qiimaha ay joogaan.

Qod. 2aad

Waxaa la buriyay sharci kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin xeer-sharcigan.

1. Xeer-Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waana in loo gudbiyaa Golaha Shacbiga si uu sharci ugu rogo.

2. Xeer-Sharcigaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1da May 1985

MADAXWEYNAHA JDS

XEER-SHACI Lr. 2 kuna saabsan wax ka bedelidda Canshuurta Furdooyinka.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ASAGOO ARKAY: Qod. 69 ee Dastuurka J.D.S;

ASAGOO ARKAY: Sharci Lr. 5 ee 11.12.68;

ASAGOO ARKAY: Sharci Lr. 3 ee 10.1.78;

ASAGOO ARKAY: Xeer-Sharci Lr. 5 ee 13.10.82;

ASAGOO GARAWSADAY: Baahida loo qabo in culeyska canshuurta laga yareeyo cunnooyinka daruuriga ah iyo daawooyinka dadka iyo xoolaha;

MADOO UU SOO JEEDIYAY: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

ASAGOO DHAGEYSTAY: Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA
Xeer-Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Canshuurta soo dejinta iyo tan maamulka iyo tirada ee ku waajiba cunnooyinka daruuriga ah iyo daawooyinka dadka iyo xoolaha waxaa laga dhimay 50% halka ay maanta joogaan.

Qod. 2aad

Badeecooyinka iyo daawooyinka ku xusan Qodobka sare waa kuwa halkan hoose ku tixan, canshuurtooda (Fiscal Duty, Costum Duty & Amministrative & Sta-

tistical Fee) oo la dhimayna waxay noqoneysaa boqol- eyda mid walba ku hor qoran:-

| TAC.Lr. | BADEECO | CANSHUURTA SOO DEJIN F/D | C/D | A&S/F |
|---|---|---|---|---|
| 08.01 | Timirta Nooc kasta/Date all kinds | 7.50% | — | 10% |
| 10.06 | Bariis Nooc kasta/Risc | 2.50% | — | 10% |
| 11.01.01 | Burka Flour | 2% | — | 10% |
| 15.07 | Saliid la cuno/nooc kasta/- Edible oil | 2% | — | 10% |
| 19.03 | Baasta nooc kasta/Past | 22.50% | 2.50% | 10% |
| 30.03 | Daawcoyinka dadka iyo xoolaha Medicin all kinds Human &Animal | 5% | — | 10% |

Qod. 3aad

Xeer-Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 20.4.85; waana in loo gudbiyo Golaha Shacbiga si uu sharci ugu rogo.

Muqdisho, 1da May 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEERKA Madaxweynaha JDS lambar 16 taariikh 20 Abriil 1985 Meel-marin Heshiis Dhaqameed oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Kenya.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo Qod. 82iid, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49, taariikh 23.12.1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 5 Taariikh 20.4.85 oo Golaha shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meel-mariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay heshiiska dhaqameed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Kenya, oo lagu kala saxiixday Magaalada Nayroobi, taariikhdu markay ahayd 28ka Nofembar 1984, kuna saabsan wax isdhaafsiga iyo wax wada qabsiga xagga Waxbarashada Sayniska, Caafimaadka, Warfaafinta iyo Isboortiga.

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, ku yeelanayaa astaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Abriile 1985

MADAXWEYNAHA JDS

Decree no. 16 of 20 Apr. 1985, Instrument of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: Article 67, para 5, and Article 82, para 4, of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The law no. 49 of 23.12.1984;

HAVING SEEN: The law no 5 of [illegible] on the base of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

the following Decree:

Article I

The Cultural Agreement Between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the Republic of Kenya, signed on NAIROBI on November 28th 1984, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the Territory of the Somali Democratic Republic.

Article III

This Decree shall come into force upon signiture by the President of Sali Democratic Republic and shall be published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 20 Apr. 1985

THE PRESIDENT OF S.D.R

XEERKA Madaxweynaha JDS lambar 17 taariikh 20 1985, Meel-marin Heshiis lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baarista Dhulalka lama Degaanka oo ka dhexeeya Dawladaha ku jira Jaamacadda Carabta.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad, Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49, taariikh 23.12.1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

MARKUU ARAAY: Sharciga lambar 6, taariikh 20.4.85. —— oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska Xeerkan ku dhimaaman;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meel-mariyo;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda.

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyay heshiiska dhexmaray Dawladaha ka tirsan Jaamacadda Carabta oo lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baarsta Dhulalka lama Degaanka ah oo lagu kala saxiixday Magaalada Qaahira sannadku markuu ahaa 1979.

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, ku yeelanayaa awaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Abriil 1985

MADAXWENYAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٧ بتاريخ ١٩٨٥/٤/٢٠
التصديق على اتفاقية انشاء المركز العربى لدراسات المناطق الجافة والاراضى القاحلة .

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور .

وعلى القانون رقم ٤٩ بتاريخ ٢٣ ديسمبر ١٩٨٤ ، الخاص بتعديل الدستور .

وعلى القانون رقم بتاريخ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على الاتفاقية المذكورة اعلاه .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على هذه الاتفاقية .

يرسم

بما هو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية — انشاء المركز العربى لدراسات المناطق الجافة والاراضى القاحلة — فى نطاق جامعة الدول العربية ، المبرمة فى مدينة القاهرة عام ١٩٧٩م .

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية .

المادة الثالثة

يسرى هذا المرسوم اعتبارا من تاريخ التوقيع عليه من قبل رئيس الجمهورية وينشر فى الجريدة الرسمية للجمهورية .

مقديشو ، فى ٢٠ ابريل ١٩٨٥م .

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية
محمد سياد برى

XEERKA Madaxweynaha JDS, lambar 18, taariikh 2 Maajo 1985 Meel-marin heshiis amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan ka qeyb galka Maal-gelinta Mashruuca Horumarinta Kalluumeysiga Badaha Waqooyi.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23.12.1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka JDS;

MARKUUU ARKAY: Sharciga lambar 7 taariikh 27.4.85 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in la meel-mariyo heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan (1.500.000/= oo ah Kuweyt Dinar) ee loogu tala galay ka qeyb galka maal-gelinta Mashruuca Horumarinta Kalluumeysiga Badaha Waqooyi, waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Kuweyt, taariikhda markay ahayd 10.9.1984.

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, ku yeelanayaa astaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 May 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٨ بتاريخ ١٩٨٥/٥/٢
التصديق على اتفاقية قرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية
والصندوق العربي للانماء الاقتصادي والاجتماعي .

رئيـــس الجمهـــوريـــة

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعـــة من المـــادة
٨٢ من الدستور .

وعلى القانون رقم ٤٩ بتاريخ ٢٣ ديسمبر ١٩٨٤ المتعلق بتعديل الدستور .
وعلى القانون رقم بتاريخ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب

على الاتفاقية المبنية فى هذا المرسوم .
ونظـــرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية .

يـــرســـــم

بمـــا هـــو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربي للانماء الاقتصادي والاجتماعي للمساهمة فى تمويل مشروع تطويـــر الصيد البحرى فى الشمال ، الموقع عليها فى مدينة الكويت بتاريـــــخ ١٠ سبتمبر ١٩٨٤م.

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية .

المـــادة الثالثة

يكون المرسوم سارى المفعول اعتبارا من تاريخ التوقيع عليه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية وسينشر فى الجريدة فى الرسمية للجمهورية .

مقدشو ، فى ٢ مايو ١٩٨٥

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية
محمد سياد برى

XEERKA Madaxweynaha JDS lambar 19, taariikh 6 Maajo 1985 Meel-marin Axdiga heshiiska Lome' III oo ka dhexeeya Dalalka ACP iyo EEC ee Sannadka 1984.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23.12.1984, kuna saabsan wax ka bedelidda Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 9, taariikh 6.5.85 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in la meel-mariyo heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay Axdiga Lome' III oo dhex maray Dalalka Afrika, Karay'bi iyo Dalalka Badweynta Basifik (ACP) iyo Dalalka Beesha Dhaqaalaha ee Yurub (EEC), laguna kala saxiixday Magaalada Lome' ee Dalka Togo 8dii Disembar 1984.

Qod. 2aad

Axdigan wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa astaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6 May 1985

MADAXWEYNAHA JDS

DECREE no. 19 of 6 May 1985, Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: Article 67 (para 5) and Article 82 (para 4) of the Constitution of Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The law no. 49 of 23.12.1984;

HAVING SEEN: The law no 9, of 6.5.85, on the base of which the People's Assembly has approved third ACP-EEC Convention;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this convention;

HEREBY PROMULGATES

The Following Dacree:

Article I

The third ACP-EEC Convention (Lome' III), signed at lome on 8 December 1984, is hereby ratified.

Article II

This convention have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic.

Article III

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be Published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 6 May 1985

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

MAXKAMADDA G. W/GALBE)D HARGEYSA

UJEEDDO:- Digireeto cusboonaysiin Jeeg Wareega oo lumay lambar yahay 0028577.

Guddoomiyaha Maxka/da G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdiraxmaan Axmed Nuur, ee ku taariikheysan 26.3.85 uuna ku codsanaayo cusboonaysiinta Jeegga Wareega ee sare ku qoran oo lumay;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga ee Lambarkeedu yahay 0372 ee taariikhdeeduna tahay 5.3.85, ayna ku caddeeyeen in Jeeggaas Lambarkiisu sax yahay lana sameeyey taariikhdu markay ahayd 9.2.85 Lacagtiisuna tahay 50.000/= Shilin, lagana sameeyey Laanta Burco, kuna qoran yahay Cabdiraxmaan Axmed Nuur;

MARKUU ARKAY: Taarka Faafinta ah ee Bangigu Laamihiisa u wada diray ee taariikhdiisu tahay 4.3.1985.

MARKUU ARKAY: Qod. 69-70 ee X.L.Y. 2 ee soo baxay 9.9.65kii;

MARKAY ARAGTAY: In Lacagta Jeeggaas uu ku qoran yahay iskana leeyahay Cabdiraxmaan Axmed Nuur.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeeggă Wareega ee Lumay ee Lambarkiisu yahay 0028577, loona cusboonaysiiyo Cabdiraxmaan Axmed Nuur, cusboonaysiintana gacanta laga saaro Jaallahaas ama cid awood buuxda ka haysata, muddo 15 casho gudahood ah ka dib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laan-Madaxtooyada J.D.Soomaaliya.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, in lagu dhejiiyo Nuqulka Go'aanka Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaas lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabasho had dii ay doonaan.

Hargeysa, 1.3.1985

Guddoomiyaha Maxka/da G. W/Galbeed ee Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Jaamac Cigaal)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareega oo dhumay oo

lambarkiisu ahaa 10103 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Liinta Saddexaad kuna qoran lacag dhan 8.000/= uu iskalahaa Jaalle Ibraahim Aadan Maxamed sida ku cad warqadda Lam. ahaa 00075 taariikh 28.4.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad;

WUXUU AMRAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 10103 oo ku qoran magaca Ibraahim Aadan Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 8.000/=.

WUXUU FASAXAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Liinta Saddexaad u badalo J/Wareega ee kor ku tilmaaman Jaalle Ibraahim Aadan Maxamed una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.4.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 19034 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 11.802,00/= uu iskalahaa Jaalle Xabiibo Xayle Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 003703 taariikhdeedu 24.4.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 19034 oo ku qoran magaca Xabiibo Xayle Cabdi ayna ku jirto Sh.So. 11.802,00/=.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u badalo Xabiibo Xayle Cabdi Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho. 24.4.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

UJ:— Baafin Jeegga Wareega ee Lam. 0030691

GUDDOOMIYAHA M. G. TOGDHEER BURCO

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeegga Wareega ee lumay Lr. 0030691;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco ee Tr. 4.5.85;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65,) Lumid Jeegga Wareega ee Lam. yahay 0030691 kuna jirtay Lacagta dhan Sh.So. 30,000/= kuna qoran tahay J.le Shuun Yuusuf Maxamed.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeegga kor ku xusan J.le Shuun Yuusuf Maxamed markii ay ka soo wareegto 20 casho gudahood laguna shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Shuun Yuusuf Maaxmed iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Burco, **4.5.1985**

GUDDOOMIYAHA M. G. TOGDHEER BURCO
(Dr. Abuukar Islow Cumar)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

UJ:- Baafin Jeegag Lumay
Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeegagga Wareega ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco taariikh 19.5.85;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65,-) Lumid Jeegagga Wareega ee Lr. 1— J/W. 0306115, kuna jirtay Sh.So. 100,000/= kuna qorayd Xalwo Saladd Sahal L/Dh. Mareeb, 2—J/W. 0031201 Sh. So. 40,000/= kuna qoran Maxamed Cali Jaamac L/Burco Tr. 6.5.85, 3—J/W. 0247297 Sh.So. 100,000/= kuna qoran J.le Cabdullaahi Jaamac Xuseen L/Xamar. 4— J/W. 0034844 Sh.So. 50,000/= kuna qoraa Cabdi Jaamac Faduul L/Berbera.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeegaggaas kor ku qoran J.le Saynab Cali Xayle markii ay ka soo wareegto muddo 20 casho ah gudahood laguna Shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In jeegaggaas cusub ee la samayndoono gacanta laga saaro J.le Saynab Cali Xayle iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.
Burco, 20.5.1985

K/S. Guddoomiyaha Max. G. Togdheer Burco
(Cabdullaahi Xasan Maxamed)

KAALIYAHA
(Jaamac Cabdullaahi Bil)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku joran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 3680 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 73.140/= uu iskalahaa Ismaaciil Xaaji Faarax sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000032 taariikhdeedu 28.5.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lam. 3680 oo ku qoran magaca Icmaaciil Xaaji Faarax ayna ku jirto Sh.So. 73.140/=.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad ay baabi'iso Buugga Kaydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 28.5.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 15417 lagana soosaaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 2.124,00/= uu iskalahaa Caasho Yuusuf Cabdi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000276 taariikhdeedu 29.4.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 15417 oo ku qoran magaca Caasho Yuusuf Cabdi ayna ku jirto Sh.So. 2.124,00/=.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad u badalo Caasho Yuusuf Cabdi Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 30.4.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

MGT/26/85

BAAFIN JEEG LUMAY

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA Gobolka Togdheer (Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwada ku saabsan jeegga ee lumay.

HADUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco

HADDUU ARKAY: Qod. 69, D L (9 — 69 lumid jeega wareega ee Lam. yahay 196308 Tr. la sameeyey lama yaqaan kuna jirto Sh. So. 100.000 kuna qoran yahay Jaalle Cabdiraxmaan Maxamed Yuusuf lagana sa meeyey L. xarunta Muqdisho.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo jeegaas kor ku xusan Jaalle Cusmaan Muuse Samatar markii ay ka soo wareegtay muddo 20 Bari ah laguna shaaciyo faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In jeegaas wareega ee cusub la samayn doono ga canta laga saaro Jaalle Cusmaan Muuse Samatar iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

Burco 31. 1. 1985

GUDDOOMIYAHA MAXKAMA G TOGDHEER ee burco

DR ABUUKAR ISLOW CUMAR